



**GIRL GUIDES**  
**A U S T R A L I A**  
**V I C T O R I A**



## Ku soo dhowaada Girl Guides

Somali

### Maxaanu nahay?

Girl Guides Victoria waa qaybta ugu ballaaran urur tabaruca ah oo gabdhaha iyo dumarka Australia. Waan ku faraxsanahay in aan ka tirsanahay Jimciyada Adduunka Girl Guides iyo Girl Scouts – ururka ugu ballaaran adduunka ee gabdhaha iyo dumarka kana kooban in ka badan 10 million oo xubna ah oo ku kala jooga 145 wadan. In ka badan 100 sano oo taariikh ah inay caawimayeen isbeddelka nololaha gabdhaha iyo dumarka, waxay u keentay inay noqdaan urur dhalinyaro oo sumcad leh lana aamini karo.

### Maxay bixiyaan Girl Guiding?

Girl Guides Victoria waxay qabtaan barnaamijyo taya leh oo gabdhaha jira 5 ilaa 17 sanadood. Habkayaga gaarka ah ee waxbarashada aan rasmiga ahayn waxaanu kor u qaadnaa masuuliyada, tabarucnimada, isku-kalsoonida iyo la socodka bulshada. Girl Guides waxay wax ku bartaan wax samayn – iyada oo xarakaad walbaa keeno tadawur shakhsiyeed. Waxaanu aaminsanahay in Girl Guides Victoria uu saamaynayo bulshadayada – hal gabar markiiba.

### Sidee gabdhuhu uga qaybqaataan Girl Guides?

Girl Guides waxay u kulmaan joogto, badanaa hal mar asbuucii, koox loogu yeero 'Guide Unit'. Guide Units waxay ku kulmaan qiyaas ahaan 1.5 saacadood asbuucii Guide Hall agagaaraha ah ama dhismaha kale oo ururku leeyahay. Guide Unit wuxuu ka kooban yahay gabdho isku da' ah kuwaas oo wadajir u wada shaqeeya, kooxa yaryar, oo loogu yeero Patrol.

### Yaa kormeera Girl Guides?

Girl Guide Unit waxaa maamula koox dumar ah oo tabaruca oo loogu yeero 'Guide Leaders'. Guide Leaders waa kuwa la aamini karo, ah dumar xirfad leh oo ah kuwa ay ka go'an tahay inay wax qabtaan oo waqtigooda ku bixiya higid, loolan iyo kaalmaynta mid kasta oo ka mid ah Girl Guide. Qof walba oo ah hogaamiyaha tusaalaynta waxaa la marsiiyaa eegis khaas ah si loogu ogolaado inuu la shaqeeyo carruurta – Victorian Police Check iyo Working With Children Check. Si aad u noqoto Guide Leader la aqoonsan yahay tabarucayaashu waxay dhamaystiraan barnaamij tababareed oo khaasa halkaas oo ay ku bartaan dhamaan xirfadaha looga baahan yahay First Aid (Gargaarka Hore) iyo shahaadooyinka CPR. Guide Unit kasta wuxuu leeyahay ugu yaraan 2 Guide Leaders.

Waxaa jira fursada badan oo dumarka si ay tabaruc uga gaystaan Girl Guides Victoria waxaana kugu dhiirigelinaynaa inaad nala soo xiriirto mar kasta oo aad wax xiisaynayso.

### Maxay ka sameeyaan Girl Guides fadhiyada?

Fadhiyada Guide Girl Guides waxay ka qaybqaataan xarakaadyada ku salaysan 'Barnaamijka Tusaalaynta Australiyaanka'. Barnaamijka Tusaalaynta Australiyaanka waa mid aan ahayn barnaamij waxbarasho oo rasmi ah kaas oo siiya gabdhaha fan iyo xarakaad firfircoon. Gabar walbaa waxay yeellataa xirfado kala duwan. Barnaamijka Guides waxay ku bartaan naftooda iyaga oo aqoonsanaya, qorshaynaya oo buuxinaya loolan, kulligood samayna fan, yeellanaya saaxiibo kuna raaxaysanaya dibad baxa. Fadhiyadooda Girl Guides: waxay bartaan xirfado; waxay cayaaraan gaymam, waxay u wada shaqeeyaan kooxkoox, waxay samaystaan saaxiibo, waxay noqdaan kuwa hal abuur leh, waxayna loolan la galaan naftooda. Girl Guides waxay kaloo helaan fursada ay ku tagaan munaasabada khaas ah iyo kaamam.

### Maxay gabdhuhu u gashadaan Girl Guides?

Girl Guides waxay leeyihiin lebis sahlan - garanka Girl Guide kaas oo aad ka gadan karto dukaankayaga Girl Guide. Maadaama Girl Guides ay ka kala yimaadeen dhaqamo iyo diimo kala duwan, waxay gabadhu dooran kartaa inay gashato dhar kasta oo dhaqanku ogol yahay iyo wixii macquulla oo ay ku gashanayso garankeeda sida: shaati gacma dheer ah oo ka hooseeya garankeeda, surweel dheer; masarka madaxa.

### Sidee uga mid noqdaa Girl Guides?

Waxaad booqan kartaa fadhiga Girl Guide saddex jeer si aad u aragto haddii gabadhaadu ay rabto inay ka mid noqoto. Si ay uga mid noqoto waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka dalabka Dhalinyarada aadna bixiso Kharajka Xubinimada Girl Guides Victoria. Qofka u noqonaya Guide Leader ayaa kuu sheegi doonaa waxa kharajku noqonayo unugeeda maxaliga ah. Haddii aad waqtiga la joogo haysato Kaarka Kharaj-dhimista waxaad siin kartaa Girl Guides Victoria kharaj xubinimo oo la dhimay. Markay noqoto xubin waxad u gadi kartaa Garanka lebiska Guide Uniform si ay ugu xirato fadhiyada ama kulamada.

Girl Guides Victoria - Maclumaad intaas ka badan fadlan la xiriir:



welcome@guidesvic.org.au



www.guidesvic.org.au/welcome



(03) 8606 3500